



# Nidaamyada Soo galista ee booqdaha/Tabarucaha

## Waa maxay sababta dugsiyada PPS ay u weydiisanayaan Aqoonsi ay Bixisay Dowladdu?

PPS waxaa ka go'an inay ka dhigto dugsiyadeena inay ahaadaan meel aamin ah ardaydeena iyo shaqaalaheena. Waxaan qaadaynaa talaabooyin dheeri ah oo aan ku hubineyno inaan ognahay cidda dugsiyeena joogta marwalba. Haddii aad ka gelaysid dugsi meel ka baxsan xafiiska weyn inta uu dugsigu socdo, waxaa lagu weydiisan doonaa inaad ku soo gasho sidii soo booqde ama tabaruce.

1. Soo bandhig Aqoonsi Dowlad-Bixiso oo la iskaan garayn karo (ID) booqashadaada ugu horreysay ee dugsi.
2. Shaqaalaha digsi waxay iskaan garayn doonaan aqoonsigaaga waxayna daabici doonaan calaamad magac rasmi ah.

## Maxaad uga jeedaa Aqoonsiga ay Dowladdu Bixiso?

Xulashada koowaad waa Aqoonsi la iskaan garayn karo oo ay bixiso hay'ad dowladeed ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Laysanka darawalka (laga helay Oregon ama gobol kale)
- Kaarka Aqoonsiga Gobolka (oo ka laga helay Oregon ama gobol kale)
- Kaarka Aqoonsiga Baasaboorka (Buugagga Baasaaboorada lama iskaan garayn karo)
- Kaarka Qunsuliyadda

## Kawaran hadaanan haysan Aqoonsiga Dawlada bixiso marka ugu horayso ee aan soo galayo?

1. U sheeg magacaaga oo buuxa iyo taariikhda dhalashada oo waxaad heli doontaa calaamad magac rasmi ah.
2. Booqashadaada xigta, fadlan soo qaado Aqoonsiga Dawladdu bixiso.

## Kawaran hadaanan haysan Aqoonsiga Dawlada bixiso gabi ahaan?

Haddii aadan haysan mid ka mid ah aqoonsiyada kor lagu soo sheegay, soo qaado hal ama in kabadan oo dukumiinti ah oo aad hayso oo ay ku jiraan taariikhdaada dhalasho iyo sawir, haddii ay suurtagal tahay. Mar alla markii shaqaaluhu xaqiijiyaan aqoonsigaaga, waxaad awoodi doontaa inaad ku gasho magacaaga kaliya booqashooyinka mustaqbalka. Haddii kale, fadlan ku



gal magacaaga iyo taariikhda dhalashada booqasho kasta. Waxaa wali lagu ogolaan doonaa inaad gasho dugsiga.

### **Ma u baahanahay inaan keeno Aqoonsiga Dowlada bixiso marwalba oo aan aado dugsiga PPS?**

Maya. Ka dib markii aqoonsigaaga la iskaan gareeyo marka ugu horeysa, waxaad awoodi doontaa inaad ku gasho magacaaga oo kaliya waxaana lagu siin doonaa calaamad magacaaga ah.

### **Maxaad ku sameyneysaa macluumaadka aad soo aruuriso?**

Magacyada iyo taariikhda dhalashada ayaa isla markaaba la barbar dhigaa diiwaanka dembiilaha galmada. Macluumaadkaaga looma barbar dhigayo xog kale ama diiwaan kale mana jiraan ilo kale oo dibadeed oo la baaro. Macluumaadka aad nala wadaagto waxaa lagu keydiyaa keydka macluumaadka gudaha ee PPS.

### **Yaa loo diidi doonaa inuu galo dugsiga PPS?**

Dembiilayaasha galmada ee diiwaangashan looma oggolaanayo inay galaan dugsiga.

**Wixii macluumaad dheeri ah, booqo [www.pps.net/visiting](http://www.pps.net/visiting)**